# Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn

## Ujeedada

Ujeedada dukumiintigaan waa in la dajiyo xeerka Shirkada Isbitaalka Children's ee d/b/a Boston

- Children's ("Isbitaalka") iyo ururada Dhakhaatiirta ee Isbitaalka xidhiidhka la leh ("Mu'asasooyinka") marka laga eego qiimo dhimisyada ay heli akraan bukaannada hela adeegyada lagu baxiyo Xarumaha Isbitaalka ama Ururada ee nidaamyada taageerada maamulka iyo shaqaalaha uu baxsho Isbitaalku, kuwaasoo uusan bukaanku haysan Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah (ee hoos lagu qeexay) daboolka ama xeerka daboolka ee baxbasho Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha (hoos lagu qeexay) ee hoostaga daboolkaas. Siyaasaddani ma dabakhayso Boston Children's Health Solutions, Rx, LLC d/b/a Boston Children's Pharmacy ama dawooyin kasta oo uu qaybiyey Boston Children's Pharmacy.

## Bayaannada Xeerka

1. Isbitaalka iyo Mu'sasadaha waxay ku dadaalayaan inay adeegyo siiyaan carruurta u baahan daryeelka, ayadoon loo eegayn xaalada caymiska ama awooda lacag bixinta.

2. Xeerkan ayaa qabanaaya dhammaan Adeegyada Xaaladda deg dega ah (ee hoos lagu qeexay) iyo Adeegyada Kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah (ee hoos lagu qeexay) ee uu bixiyo Isbitaalka iyo Mu'asasooyinka. Adeegyada Xaaladda degdega ah iyo Adeegyada kale ee laga ma marmaanka ah ee Caafimaadka kuma jiraan qaliinada ikhtiyaariga ah ee isqurxintu.

3. Isbitaalku wuxuu Adeegyada xaaladda deg dega ah siin doonaa dhammaan bukaannada, si bilaa takoor ah ama ayadoon laga eegin in bukaanku uu xaq u yeelan karo caawimaad uu ku helo Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn. Isbitaalku wuxuu mamnuucayaa talaabooyin kasta kuwaasoo ka hor istaagaaya dadka inay dalbadaan Adeegyada Degdega ah, sida in laga dalbado bukaanada yaala Waaxda Xaalada degdega ah inay baxshaan qarashka kahor intaan laga Adeegyada degdega ah ama ogolaanshaha talaabooyinka lacag qaadista kuwaasoo carqaladaynaaya bixinta daryeelka, ayadoon la kala saarin xaaladaha, Adeegyada Degdega ah.

2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

4. Isbitaalka iyo Ururadu, ayagoo usii maraaya qaybta Talo Bixinta Dhaqaalaha ee Isbitaalka, waxay ka caawin doonaan bukaannada/Wakiilada (sida hoos lagu qeexay) hanaanka dhamaystirka codsiyada loo diro Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka ee Dadwaynaha (hoos lagu qeexay), mar kasta ooy suuragalayso.

© Boston Children's Hospital,

5. Bukaannada buuxsha shuruudaha lagu qeexay Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, qiima dhimista loo samaynaao bukaankaas waxaa la waafajin doonaa Adeegyada xaaladda deg dega ah iyo Adeegyadan kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah.

6. Isbitaalka iyo Mu'sasadaha waxay (a) ka dhowrsan doonaan dadaalo kasta oo ay ku aruursanayaan qarashka Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee bukaanada ka reeban in laga qaado talaabo looga aruurinaayo lacagta sida ku cad Xeerka Qarash aruurinta iyo Daynta ee Isbitaalka iyo xeerarka arintaan quseeya ee Health Safety Net; (b) waxay celin doonaan lacag kasta oo laga qaaday bukaanada helay deegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah; iyo (c) waxay waxay wadaagayaan xogta ku saabsan caymiska bukaannada iyo u qalmida Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha ama barnaamijyada kale ee caawimaada dhaqaalaha ee ay baxshaan Isbitaalka iyo Mu'sasadaha .

7. Isbitaalka iyo Mu'sasadaha waxay bixin karaan qiimayaal la siinaayo dadka aan caymiska haysan oo lagu salaynaayo adeegyo gaar ah oo qiimo dhimis leh, sida adeegyada qaliinka isqurxinta ee aan Caafimaad ahaan Muhiimka ah iyo qaliinnada wadnaha qaarkood. Qiimo dhimisyada lagu qeexay xeerkan ma quseeyaan qiimayaashaas gaarka ah.

8. Isbitaalka iyo Mu'sasadaha, waxay si waafaqsan Xeerka iyo Qarash Uruurinta, kordhin karaan qiimo dhimisyada in ka badan kuwa ku jira Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, si qof iyo xaaladiisa ah si loo tixgaliyo xaaladaha gaarka ah ee dhibaatooyinka dhaqaale.

9. Mu'sasadaha ayaa joogteynaya xeerarka qiimo dhimista kuwaasoo qabanaaya bukaannada helaaya adeegyada lagu baxsho Urur laguna baxsho xarun aan xidhiidh lalahay Isbitaalka (tusaale, bukaannada adeegyadooda aan lagu mudayn Nidaamyada cogta ee Isbitaalka).

10. Ku guul daraysiga raacida habraacyada lagu qeexay dukumiintigaan waxay keeni kartaa dib u dhac ama diidista Isbitaalka ama Mu'sasadaha a kuu diidaan qiimo dhimis kasta oo lagu heli karo Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn.

## Qeexitaannada

**Bukaanka Maxaliga ah:** Bukaan Dagan Maraykanka:

**Adeegyada Degdega ah:** Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee la baxshay kadib markay timid xaalad caafimaad, mid jireed ama mid dhimirka ah, oo astaamaheedu daliil u yihiin inay aad u daran tahay, ayna ku jiraan xanuun daran, taasoo keenaysa in haddii aan degdeg gurmad caafimaad loogu samayn qofka ay keeni karto sida uu cadeeyo qof aqoon caafimaad u leh xaalada in ay galinayso caafimaadka qofka ama qof kale khatar aad u wayn, naafo wayn oo

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

gaarta shaqada jirkiisa ama naafada daran ee unug ka mid ah jirka ama qayb ama, marka ay tahay haweeneey uur leh, sida lagu qeexay qaybta 42 USC ee 1395dd(e)(1)(B).

**Damiintaha**: Qof Ama koox dad ah, ayna ku jiraan, si aan xadidnayn, waalidiinta bukaanka, masuuliyiinta sharciga ah iyo xubnaha kale ee qoyska, kuwaasoo qaadanaaya masuuliyada lacagta dhammaan ama qayb ahaan qarashaadka adeegyada Isbitaalka ama Ururada.

**Bukaan Caalami ah:** Bukaan aan daganayn Maraykanka:

**Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah:** Adeegyada sida macquulka ah loo filanaayo inay ka hortagaan, baaraan, ka hortagaan kasii darista, yareeyaan, saxaan, ama daaweeyaan xaalado caafimaad oo nolol khatar ku ah, keenaaya dhibaato ama xanuun, keenaaya cilad jireed ama naafo, keenaaya khatarta ama imaanshaha khatar naafo, ama keenaaya cudur ama daciifnimo.

**Adeegyada aan Qarashkooda laga bixin Bukaanka:** Adeegyada aan Qarashkooda laga bixin Bukaanka waxaa ku jira Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee (a) aan ugu jirin inay yihiin adeegyada ay daboolaan gunnooyinka/uqalma gunnada Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ee Bukaanka ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, ama kaasoo uu dhaqaale ahaan masuul ka yahay bukaanku uuna siinaayo bixiyaasha adeegyada noocaas ah; (b) adeegyo ku jira kuwa gunnooyinku daboolaan/u qalma caawimaada, laakiin la baxsho kadib marka bukaanku uu dhamaystay dhammaan gunnooyinka ku jira Qorshaha Caafimaadka Shaqsiga ah ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Dadwaynaha; ama (c) adeegyo uu baxshay adeeg bixiye aan ku jirin shirkada caymiska caafimaadka/barnaamijka.

**Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah:** Waa caymiska adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagu baxsho caymiska caafimaadka, qorshaha caafimaadka ama daboolid kale ama qorshe kale oo kasta oo caafimaad, fayaqab ama qorshe kale, maaliyad ama haayad loo sameeyay ujeedo ah bixinta qarashka, ama haddii kale xal u helida qarashka, adeegyada daryeelka caafimaadka oo la siiyo dadka ka diiwaan gashan gudaha ama laan hoos tagta caymiskaas, qorshahaas ama barnaamijkaas. Ayadoon la xadidin cidda ay daboolayaan si guud, Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah waxaa ku jira qorshayn kasta oo ay samayso Safaarada, laanta caafimaadka e wadanka shisheeye ama dawlada kale ee shisheeye ama haayad dawladeed oo xalinaysa qarashka adeegyada daryeelka caafimaadka ee la siiyo muwaadiniinteeda, dadka wadanka dagan ama shaqsiyaadka kale.

**Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha:** WAa barnaamijyo ay abuurtay dawlada gobalka ama an Federaalka si loobaxsho qarashka ama haddii kale xal loogu helo qarashka adeegyada daryeelka caafimaadka ee caymiska ku jira/u qalma caawimaada ee la siiyo shaqsiyaadka buuxsha shuruudaha u qalmida barnaamijka. Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, MassHealth, Health Safety Net, ConnectorCare, barnaamijyada kale ee Medicaid iyo Medicare.

**Diigaanka:** Marka laga eego ujeedooyinka Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, haddii uu yahay iyo haddii kale bukaanku qof dagan Maraykanka waxaa lagu go'aaminayaa isla habka, waxaana qabanaaya shuruudaha ay adeegsadaan, MassHealth marka laga hadlaayo barnaamijyada lagu baxsho Xafiiska Fulinta ee CAafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Barwaaqa sooranka Massachusetts.

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

## Shardiga U qalmida Qiimo Dhismista Bukaanka aan Caymiska Lahayn

Si ay ugu qalmaan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn ee ku jira Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, guud ahaan, bukaannadu waa inay buuxshaan shuruudaha u qalmida ee soo socda:

1. Adeegyada la bixinaayo waa inay noqdaan Adeegyada Xaaladda deg dega ah ama Adeegyada Kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah;
2. Bukaanku waa inuusan u qalmin/xaq u lahayn caawimaad dhaqaale oo lagu baxsho Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka iyo Ururada;
3. Bukaanku waa inuusan u qalmin/xaq u lahayn wax caymis ah oo lagu baxsho Adeegyada Xaaladda deg dega ah ama Adeegyada kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee uu Isbitaalku iyo/ama ururadu siiyaan Bukaanka kaasoo hoostaga Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Wax kamid ah Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha; Ujeedada Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn awgeed, bukaanka waxaa loo aqoonsanayaa mid aan haysan/u qalmin Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha marka laga eego Adeegyada aan La daboolayn; iyo
4. Bukaanka/damiinku waa, mudada lixdanka (60) maalmood ee xigta bilaabida adeegga Adeegyada Xaaladda deg dega ah ama Adeegyada kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah, uusan si iskiis ah u joojin caymiska ama u qalmida ku cad caymiska Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha.

## Habraacyada Codsashada iyo Dalbashada Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn

Marka (a) La tliyaasha Dhaqaalaha ee Isbitaalku go'aanshaan in bukaanku uusan u qalmin/xaq u lahayn caawimaad dhaqaale oo lagu baxsho Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka iyo Ururada, (b) xaqiijinta in bukaanku uusan u qalmin/xaq u lahayn uusana ku jirin daboolka caymiska Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha ee la xidhiidhaAdeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee la siiyo bukaanka, iyo (c) bukaanbku markuu buuxsho dhammaan shuruudaha u qalmida ee ku cad Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, habraacyada soo socda ayaa caadiyan la raacayaa:

1. Haddii bukaanku yahay Bukaanka Maxali ah, Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaankaayaa siin doona bukaanka/Damiinka qiyaasta qarashaadka Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee la siinaayo ("Qiyaasta"), waxayna qabanaysaa Qiimo dhimista Bukaanka Maxaliga ah ee Qiyaasta. Bukaanka/Damiinku waa inuu baxshaa cadadka lagu cadeeyay Qiyaasta, qiimaha Qiimo Dhimista Bukaanka Maxaliga ah, si buuxda, kahor intaan la siin Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee ku jira Qiyaasta; marka la xaqiijiyo in, marka laga eego Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah, inaan wax Qiyaas ah la bixin doonin, qarashkana aan loo baahan doonin, kahor intaan la bixin Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah, Qiimo

© Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

dhimista Bukaanka Maxaliga ah ayaa la waafajin doonaa biilka Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah haddii Bukaanka/Damiinku baxsho, ama uu galo qorshe lacag bixin oo Isbitaalku kula heshiiyo, Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah muddo afartan iyo shan (45) maalmood ah marka biilka Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah laga dalbado; ama

2. Haddii bukaanku yahay bukaan Caalami ah, Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ayaa siin doona Bukaanka/Damiinka Qiyaasta. Bukaanka/Damiinku waa inuu baxshaa cadadka lagu cadeeyay Qiyaasta, si buuxda, kahor intaan la siin Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee ku jira Qiyaasta; marka la xaqiijiyo in (i) marka laga eego Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah, inaan wax Qiyaas ah la bixin doonin, lacag bixinta looma baahan doono kahor intaan la bixin Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah, bukaanka/Damiinkuna waa inuu baxshaa qarashaadka Adeegga Xaaladda deg dega ah afartanta iyo-shan (45) maalmood gudahood marka uu helo biilka Adeeggaas Xaaladda deg dega ah si uu xaq ugu yeesho Qiimo Dhimista Bukaan Caalami ah. Marka la dhameeyo shaqada daawaynta Bukaanka Caalamiga ah uu dhameeyo Isbitaalku iyo/ama Ururku, Qiimo Dhimista Bukaanka Caalamiga ah ayaa la waafajin doonaa qarashaadka Adeegyada Caafimaad Ahaan muhiimka ah iyo Adeegyada Degdega ah, hadday jiraan, ee la siiyay bukaanka Caalamiga ah, iyo haddii codsiga Qiimo Dhimisyada Bukaanka Caalamiga ah (x) ay keenaan baaqi dayn ah oo la xidhiidha biilka Bukaanka Caalamiga ah, Isbitaalka/Ururka, ayaa, sida ku haboon, u celin doona lacagta bukaanka/Damiinka cadadka buuxa ee baaqiga daynta ah, ama (y) iska dhaafaaya baaqiga taagan ee lagu leeyahay Isbitaalka iyo/ama Ururka, Bukaanka/Damiinku waa inuu baxshaa baaqiga soo haray, si buuxda, afartan iyo shan (45) maalmood gudahood kadib biilasha si uu u helo Qiimo Dhimista Bukaanka Caalamiga ah ee lagu siiyo Adeegyada Caafimaad Ahaan Muhiim ah iyo Adeegyada Degdega ah, hadday jiraan, ee la baxshay intii la daawaynaayay bukaanka.

## Qiimo Dhimista La heli karo

1. Isbitaalka iyo Ururka ayaa siiya Bukaannada Caalamiga ah ee buuxsha shuruudaha u qalmida ee ku cad Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn 40% qiimo dhimis uu ku helaayo Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee u qalma.

2. Isbitaalku wuxuu siiyaa Bukaannada caalamiga ah ee buuxiya shuruuda lagu sharxay Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn qiimo dhimis dhan 24% Mu'sasadaha waxay siiyaan Bukaannada Caalamiga ah ee buuxsha shardiga u qalmida ee ku cad Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn qiimo dhimis dhan 10% ee Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah iyo Adeeggyada Xaaladda deg dega ah ee U qalma.

3. Qiimo dhimisyadaan ma quseeyaan adeegyo kasta oo uu Isbitaalka bixiyo amaMu'asada(yinka) kuwaasoo kaas oo daboolada adeegyada ama adeegyo u qalma Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha.

© Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

# Daabacaada/Helitaanka Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, Xeerka iyo Qarash Uruurinta, iyo Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka

1. Dadka ayaa heli kara nuqulka Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, Xeerka iyo Qarash Uruurinta, iyo Cadadyada Caadiyan Laga Qaado Bukaanka si bilaash ah ayagoo ku helaaya mid kamid ah qaababka soo socda:

   a. Daabacaada Interneetka: Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka iyo Mu'asasada(yinka), Xeerka Daynta iyo Aruurinta Daynta iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn iyo Xogta Kooban ee Luuqada Fudud ee Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, iyo sidoo kale Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha, ayaa looga heli karaa online-kawww.childrenshospital.org/financialassistance

   b. Shaqsiyan: Koobiyada waraaqaha ah ee Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka iyoMu'asasa (ooyinka), Xeerka Daynta iyo Aruurinta Daynta iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn iyo Xogta Kooban ee Luuqada Fudud ee Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, iyo sidoo kale Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha, ayaa laga heli karaa xarunta isbitaalka oo ku taala 300 Longwood Avenue, Boston, MA, Farley Building room 160.

   c. Iimayl ahaan: Dadwaynuhu waxay codsan karaan inay nuqulka ku helaan boostada ayagoo wacaaya Adeegyada Taageerada Macmiilka ee Dhaqaalaha Bukaanka oo laga heli karo (617)-355-3397 iyo/ama Talo Bixinta Dhaqaalaha ee Bukaanka 617-355-7201.

2. Turjumaadaha luuqadda shisheeya ee Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, Xogta Luuqada Fudud ee Kaalmada Dhaqaalaha, Xeerka Daynta iyo Xaruunta Qarashka, iyo Xisaabinta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ayaa lagu heli karaa luuqado kala duwan si loo caawiyo dadka aan si fiican u aqoon Ingiriiska.

3. Khadka Isgaarsiinta: Isbitaalku wuxuu sameyn doonaa dadaalo si uu ugu sheego helitaanka caawimaada dhaqaalaha iyo qiimo dhimisyada kale asagoo adeegsanaaya qaabab kaladuwan.

   a. Boor ayaa lagu dhajin doonaa aagaga diiwaan galinta xogta helitaanka caawimaada dhaqaalaha.

   b. Boorarka bulshada iyo tallaabooyinka surtagalka ah ee lagu xisaabiyay soo jiidashada booqdayaasha' dareenka dadka isbitaalka yimaada ayaa loogusoo dhajinayaa meelo kaladuwan dhammaan Isbitaalka.

   c. Koobiyada Xeerkan Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn ayaa la siin doonaa dhammaan bukaannada midkood waqtiga diiwaan galinta ama ayadoo qayb ka ah hanaanka isbitaal ka saarida.

© Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

## Dukumiintiyada Dheeraadka ah/La xidhiidha, Xeerarka iyo Barnaamijyada

1. Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha
2. Xogta kooban ee Luuqada Fudud Ku qoran ee Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha
3. Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha
4. Xeerka Daynta iyo Aruurinta Daynta
5. Xisaabta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka
6. Barnaamijyada Kaalmada Dhaqaalaha ee Bukaanka Caalamiga ah

## Qaybaha Dukumiintiga

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Cinwaanka** | Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn | | |
| **Qoraayaasha** | Thomas Pellegriti, Agaasimaha Canshuurta iyo Ku dhaqanka Xeerka Dhaqaalaha | **Taariikhda uu Dhaqan galaayo** | 9/30/2016 |
| **Waxaa dib u Eegay/ Muraajaceeyay** | Gudoomiye ku xigeenka, Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, Boston Children's Hospital<br>Madaxa Waaxda Dhaqaalaha, Boston Children's Hospital<br><br>Mudane. Madaxwayne Ku xigeenka Sare iyo La taliyaha Guud, Boston Children's Hospital | **Taariikhaha Dib loo Eegay/ Saxay:** | 12/7/2021<br><br>12/10/2021 |
| **La ansixiyey** | 12/20/2021<br><br>____________________<br>Gudigga Agaasimayaasha ee Boston Children's Hospital | **Effective Date** | 03/1/2023 |

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin